Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

TURVAPAIKKA-, MAAHANMUUTTO- JA KOTOUTTAMISRAHASTO

Euroopan unionin tuella

# Macluumaad loogu talaggalay dadka magangelyoddoonka ah

## Caruurta aan lahayn waalid ama masuulka ilmaha


Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

## WAXAAD KA SOO CARARTAY DALKAAGA HOOYO, WAXAADNA MAGANGELYO U SOO RAADSATAY FINLAND.

**Waxaad sheegtay inaad ka yartahay 18 sano. Sida uu qabo sharciga Finland, dhammaan dadka kayar da'da 18 sano waa carruur. Waxaa ay xaq u leeyihiin badbaado iyo daryeel gaar ah. Dhammaan carruurta ku nool Finland waxaa ay leeyihiin xuquuq isku mid ah, sida xuquuqda inay iskuul dhigtaan iyo in daawo ay helaan haddii ay xanuunsadaan.**

Inkasta oo aad Finland timid waalid la'aan ama masuul la'aan, keligaa ma tihid. Waxaa jira dad badan oo waaweyn oo ku caawin doona. Shaqaalaha xerada qaxootiga ayaa daryeelaaya nololwanaaggaaga iyo barbaarintaada. Waxaad kaloo heli doontaa wakiil kaa caawin doono arrimaha kala duwan ee kaala dhexeenaya masuuliyiinta.

Buuggan yar wuxuu sharraxayaa waxa dhacaya marka aad magangelyo ka codsato Finland. Waxaad had iyo jeer weydiin kartaa wixii macluumaad dheeri ah xerada qaxootiga ama wakiilkaaga.



### MASUULIYIINTA WAXAA WAAJIB KU AH INAY XAFIDAAN SIRTA

- Dalka Finland waxaad aamini kartaa masuuliyiinta, oo ay ku jiraan booliska, ciidanka Ilaalada xudduudka iyo shaqaalaha Waaxda Socdaalka ee Finland. Waa xirfadlayaal ku shaqeeya sida sharciga waafaqsan.
- Dhammaan shaqaalaha falanqaynaaya arimahaaga waxaa waajib ka saaran yahay xifdinta sirta. Tani waxaa ay ka dhigan tahay in aan loo oggolayn inay kala hadlaan dadka iyaga ka baxsan, wax kasta oo ku saabsan arrimahaaga. Shaqaalaha jooga xerada qaxootiga, turjubaannada, wakiilkaaga iyo caawiyahaaga arrimaha sharciga waxaa sidoo kale waajib ku ah inay xafidaan sirta.



## Hanaanka loo codsado magangalyada



### 1. U sheeg masuuliyiinta ilaaladda xudduudka ama booliiska inaad rabto inaad codsato magangalyo.

Waxaad Finland ka codsan kartaa magangelyo, marka aad dhex joogto dalka gudihiisa oo kaliya. Markaad timaaddo Finland, u sheeg masuuliyiinta ilaalada xudduudka ama booliska inaad rabto inaad codsato magangelyo. Masuuliyiinta ayaa kuu diiwaangelin doona inaad tahay maganelyoddoon, waxaana ay diiwaanka dadka ajaanibta ah gelin doonaan macluumaadkaaga aasaasiga ah, faraha ayay kaa qadayaan oo keydinayaan (keliya wixii ka weyn 6 sano) iyo sidoo kale saxiixaagaba, waxaa kaloo ay kaa qaadi doonaan sawirro. Hadii aad haysatid baasaaboor ama dukumenti kale oo aqoonsi ah, tus masuuliyiinta.

Fadlan ogoow inay dambi tahay inaad siiso masuuliyiinta Finland macluumaad been ah oo ku saabsan aqoonsigaaga. Dhammaan dadka ka weyn da'da 15 sano waxaa loo qabanayaa masuuliyadda dembigooda.

- Inta lagu guda jiro falanqaynta codsigaaga, waxaad xaq u leedahay inaad ku noolaato Finland.
- Xubnaha qoyskaaga waxaa ay codsan karaan sharciga degganaanshaha Finland oo keliya markii aad hesho sharcigaaga degganaanshaha kaddib.







### 2. Masuuliyiinta ayaa kuu tilmaami doona xerada qaxootiga.

Waxaad ku noolaan kartaa xerada qaxootiga tan iyo inta lagu gudajiro falanqaynta codsigaaga. Sidoo kale waxaa halkaas ku nool carruur kale, oo aan waalidkood joogin Finland. Xerada qaxootiga dhexdeeda waxaad ku haysataa ammaan. Waxaa marwalba goobtaas jooga shaqaale aad la hadli karto, islamarkaana aad weydiisan karto wixii caawimaad ah ee aad u baahan tahay.

Shaqaalaha xerada qaxootiga ayaa daryeeli doona xannaanadaada, barbaarintaada iyo nololwanaaggaaga maalin walba aad u baahan tahay. Waxaad aadi kartaa iskuulka, waxaadna yeelan kartaa hiwaayado kala duwan.

Waa inaad u hoggaansantaa sharciyada xerada qaxootiga, waana inaad samaysaa wixii  lagu heshiiyay in la sameeyo. Haddii aad dhibaato ku qabto carruurta kale, u sheeg shaqaalaha. Sidoo kale u sheeg shaqaalaha xerada qaxootiga halka aad joogtid, oo ka jawaab teleefanka haddii xerada qaxootiga lagaa soo waco.

Xerada qaxootiga wax saameyn ah kuma yeelan karto falanqaynta codsigaaga magangelyada.




## 3. Maxkamadda degmada ayaa kuu samayn doonta wakiil.



Sida sharcigu dhigaayo, dadka da'doodu ka yar tahay 18 sano waa carruur, kaligood ma dhhamaysan karaan arrimaha danahooda ah ee ay la yeelanayaan masuuliyiinta dalka. Sababtaas awgeed ayaa maxkamadda maamulka ay kuugu samaynaysaa wakiil. Wakiilkaaga waa qof weyn oo kaa caawin doona hawlaha magangelyada iyo arrimaha kale ee rasmiga ah. Waajibkiisa waa in uu hubiyo  in xaaladaha kala duwan ee arrimahaaga, la tixgelinaayo wixii dantaada ay ku jirto.


**MUXUU WAKIILKU SAMEYNAYAA?**

- Wakiilkaaga wuxuu ku weydiin doonaa aragtidaada ku aadan arrimaha kala duwan, wuxuuna xaqiijinayaa in masuuliyiinta ay arrimahaas tixgelinayaan.
- Wakiilka wuxuu kuu sheegayaa macluumaadka la xiriira xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga inta lagu gudojiro howlaha magangelyada.
- Wakiilka wuu kula joogayaa markaad la kulmeysid masuuliyiinta, tusaale ahaan Waaxda Socdaalka ama booliska. Wakiilka ayaa sidoo kale la xiriiri doona masuuliyiinta isagoo adiga ku matalaaya.
- Wakiilka ayaa u sheegaya masuuliyiinta aragtidiisa la xiriirta, sida ay dantaadu ku jirto, marka laga hadlaayo xaaladaha kala duwan ee arrimahaaga.
- Haddii loo baahdo, wakiilka ayaa kuu raadinaaya qareen ama caawiye arrimaha sharciga, isaga ayaana la xiriiraaya qareenka ama caawiyaha arrimaha sharciga.
- Wakiilka iyo adiga ayaa wada saxiixaaya waraaqaha muhiimka ah.

**WAXA WAKIILKA UUSAN SAMEYNAYNIN:**

- Wakiilkaaga ma daryeelaayo arrimaha la xiriira daryeel maalmeedkaaga iyo barbaarintaada. Xarunta qaxootiga  ayaa u xilsaaraan arrimahaas.
- Wakiilkaaga ma soo faragashanaayo xeerarka iyo nidaamka xerada qaxootiga.
- Wakiilka wax lacag ah kuma dayminaayo, alaabna kuuma soo iibinaayo.
- Wakiilka gurigiisa kulama noolaan kartid.

Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service



### 4. Waaxda Socdaalka ee Finland ayaa baaraysa in codsigaaga lagu baari doono gudaha Finland iyo inkale.

Marka la diiwaangeliyo codsigaaga magangelyada, waxaa loo gudbinayaa Waaxda Socdaalka ee Finland si loo falanqeeyo.

Dowladaha xubnaha ka ah Midowga Yurub iyo waliba Norwey, Iceland iyo Liechtenstein waxaa ay raacaan xeerka Dublin ee qiimaynta codsiga magangelyada. Sida waafaqsan xeerkaas, codsga magangalyada ayaa lagu baari karaa mid ka mid ah wadamadaas. U sheeg mas'uuliyiinta hadii:

- aad ku leedahay xubno qoys ama qaraabo dal kale oo kujira heshiiska Dubln
- aad ku leedahay sharciga degganaanshaha ama dalkuggal mid ka mid ah dalalka heshiiska Dublin
- aad horey u soo degtay dal kale oo kujira heshiiska Dulblin
- Fara lagaaga qaaday dal kale oo kujira heshiiska Dublin
- aad ka raadsatay magangelyo dal kale oo kujira Dublin

Haddii xubno qoyskaaga ka tirsan ama qaraabadaada ah ay joogaan dal kale oo ka mid ah dalalka ku bahoobay heshiiska Dublin, waxaa la isku dayi doonaa sidii la isugu kiin geyn lahaa, ama dalka ay joogaan ama dalkaan Finland midkood. Codsigaaga magangelyoddoonka waxaa markaa kaddib lagu falanqayn doonaa dalkaas. Haddii aadan ku lahayn xubno qoys ama qaraabo dal kale oo Dublin ka tirsan, codsigaaga waxaa lagu falanqaynayaa Finland.

Codsigaaga magangelyada waxaa sidoo kale baritaankiisa laga joojin karaa Finland xaaladahan soo socdo:

- In horey magangelyo lagaaga siiyay dal nabad ah.
- In aad ka timid markaad Finland soo galaysay, dal nabad ah oo aad magangelyo ke heli kartay.

## 5. Waraysiga waxaa lagu caddaynayaa, sababta aad u codsanayso magangelyada.

Wareysiga magangalyada waa ballan aad muhiim u ah. Wakiilkaaga ayaa kaa caawin doona inaad u soo diyaar garoowdo. Waaxda Socdaalka ee Finland ayaa kuugu yeeri doonta wareysiga magangelyoddoonka. Fadlan si taxaddar leh u akhri waraaqda u yeerista iyo dokumintiyada la socda, iyadoo uu wakiilkaaga kula joogo. Xerada qaxootiga ayaa kuu diyaain doonta gaari ku geeya goobta wareysiga.

Wakiilkaaga ayaa kula jooga marka wareysiga lagula yeelanaayo. Sidoo kale caawiyahaaga arrimaha sharciga ama qareenka ayaa ka soo qaybgalaaya wareysiga, haddii loo baahdo.

Waqtiga wareysiga, masuuliyiinta ayaa ogaan doona qofka aad tahay iyo sida aad ku timid Finland. Waxaad u baahan tahay inaad bixiso macluumaad sax ah oo kooban oo ku saabsan xubnaha qoyskaaga. Hadii aad bixiso macluumaad been ah, waxaa hadhoow gadaal kaaga adkaan doonta in aad qoyskaaga keento Finland.

Waxaa lagu weydiin doonaa sababta aad uga soo carartay waddankaaga hooyo iyo sababta aadan ugu laaban karin. Horey u soo qaado caddayn walba oo macquul ah oo taageeri karta sheekadaada.

Si geesinimo leh uga hadal wax walba oo aad ogtahay iyo sida ay saamayn ugu yeelan karaan codsigaaga magangelyoddoonka qaxootinnimo. Sidoo kale sheeg haddii aadan aqoon ama aadan xusuusan. Waxaad kaloo sheegtaa haddii aadan fahmaynin hadalka turjubaanka ama qaar kamid ah su'aalaha lagu weydiiyay.

Waa muhiim inaad sheegto dhammaan sababaha codsigaaga hal mar. Haddii aad gadaal dambe ka sheegtid sababo cusub, waa inaad sheegtaa sababta aad arrimahaan hore ugu sheegi wayday. Sababta waa inay noqotaa mid aadan adiga shakhsi ahaan saameyn ku yeelan karin.

Qoraal ayaa laga sameyn doona wareeysiga, waxaana lagu siin doonaa koobi ka mid ah qoraalka oo aad adigu haysanaysid (haddii da'daadu ay ka weyn tahay 15 sano), sidoo kale waxaa koobi la siin doonaa wakiilkaaga.

### WAQTIGA FALANQAYNTA CODSIGA

- Falanqaynta codsigaaga magangelyoddoonka qaxootinnimo waxaa ay qaadanaysaa ugu badnaan 6 bilood. Fadlan si degganaan leh u sug go'aanka.
- Haddii codsigaaga aan lagu go'aamin karin 6 bilood gudahood, Waaxda Socdaalka ee Finland ayaa kuu sheegi doonta qiyaasta wakhtiga go'aanka la gaari doono.
- Waxaad sidoo kale ka fiirin kartaa waqtiga la filaayo in arrinkaaga lagu falanqeeyo, boogga internetka ee Waaxda Socdaalka ee Finland.

### CADDAYMAHA DHEERAADKA AH

- Wixii caddaymo dheeraad ah ee aad hayso wareysiga kaddib, waxaad u soo gudbin kartaa Waaxda Socdaalka. Waxaad caddaymo dheeraad ah soo diri kartaa, tusaale ahaan haddii xaaladdaada uu isbeddel weyn ku yimid, dhacdooyinka cusub ee ka dhacay waddankaaga hooyo awgeed, ama haddii aad illowday inaad wax muhiim ah sheegto inta lagu guda jiray wareysigaagii maganelyoddoonka qaxootinnimo.
- Kala hadal arrinkan wakiilkaada. Isaga ayaa haddii loo baahdo u diraaya wixii macluumaad dheeraad ah ee jira Waaxda Socdaalka ee Finland.



## 6. Waxaad helaysaa go’aanka codsigaaga

Wareysiga kaddib, Waaxda Socdaalka ee Finland waxey sii wadeysaa caddaynta iyo baaritaanka codsigaaga. Hadii loo baahdo, waxaa lagu weydiin doonaa inaad bixiso macluumaad dheeraad ah. Markii codsigaaga go’aan laga gaaro, waxaad heli doontaa go’aan qoraal ah.

Go’aankaagu waxaa uu ku salaysan yahay xeerka ajaanibta, macluumaadkii aad ku bixisay wareysiga, macluumaadka kale ee lagu soo bandhigay arrintan, iyo macluumaadka ay Waaxda Socdaalka ee Finland ka heyso xaaladaha ku saabsan dalkaaga hooyo.

Go’aanka wuxuu noqon karaa mid oggolaansho ah ama mid diidmo ah. Booliska ama Waaxda Socdaalka ee Finland ayaa ku siin doona go’aanka adiga iyo wakiilkaaga. Adiga iyo wakiilkaaga si wadajir ah u akhriya go’aanka.



### GO’AAN OGGOLAANSHO AH

Waxaa lagu siinaayaa sharciga degganaanshaha dalka, taasoo macnaheedu yahay inaad joogi karto Finland. Waxaa si toos ah lagaaga diiwaangelinayaa Nidaamka Macluumaadka dadweynaha ee Finland, waxaadna heli doontaa taariikhda dhalashada iyo nambarka diiwaanka (henkilötunnus).

Sharciga degganaanshaha waxaa lagu bixin karaa sababo kala duwan. Sababahaasi waxaa ay kala yihiin:

1) magangelyo,

2) badbaadada heerka labaad ee caalamiga ah,

3) sababo gaar ah oo dhanka bani’aadninimada la xiriira,

4) arrinka ah inaan qofka dalka laga saari karin ama

5) in qoka uu noqday dhibbane la kulmay ka ganacsiga dadka.

Waxaad go’aankaaga ku arki doontaa sababaha laguu siiyay sharciga degganaanshaha dalka. Waxaad ka heleysaa macluumaadka dheraadka ah ee ku saabsan sababaha kala duwan ee lagu bixiyo sharciga degganaanshaha dalka, bogga internetka iyo muqaallada fiidiyowyada ee ay diyaarisay Waaxda Socdaalka ee Finland.

Haddii aadan ku qanacsanayn go’aanka lagu siiyay, waxaad rafcaanka arrinkaaga u gubin kartaa maxkamadda Maamulka. Qareenka ama caawiyaha arrimaha sharciga ayaa diyaarin doona warqadda racfaanka, iyadoo aad adiga iyo wakiilkaagaba isaga la joogtaan.

**KAARKA SHARCIGA DEGGANAANSHAHA DALKA (CIQAAMADDA)**

Waxaa go'aanka la socda oo aad heli doontaa kaarka sharciga degganaanshaha dalka (ciqaamadda). Kaarku wuxuu caddaynayaa inaad xaq u leedahay inaad ku noolaato Finland. Kaarka wuxuu shaqeenayaa inta sharcigaaga degganaanshaha dalka uu shaqeenaayo.

**KAARKA AQOONSIGA**

Dalkaan Finland, waxaa loo baahan yahay kaar aqoonsi ah tusaale ahaan si aad u furato akoon bangi. Baasaboorka uu bixiyo dalkaaga hooyo ama kaarka aqoonsiga Finland ayaa loo aqbalaa dokumenti aqoonsi ahaan ah. Booliska ayaad ka codsan kartaa kaarka aqoonsiga.

**DOKUMENTIGA SAFARKA**

Sharci ahaan, waxaad u baahan tahay inaad haysato dokumenti safar oo shaqaynaaya. Haddii lagu siiyo magangelyo, waxaad codsan kartaa dokumentiga safarka ee qaxootiga. Haddii laguugu siiyo baadbaadada heerka labaad ee caalamiga ah ama sharciga degganaanshaha ee kale, waxaad codsan kartaa baasaboorka ajnabiga. Waxaad u safri kartaa dibadda, dibna ugu soo laaban kartaa Finland adiga oo siticmaalaya dokumiintiyadaas.

**U GUURISTA DEGMADA/MAGAALADA**

Markii aad hesho sharciga degganaanshaha, waxaad ka guureeysaa xerada qaxootiga, waxaadna u guureysaa guriga daryeelka carruurta. Waxaad ku noolaan kartaa halkaas ilaa aad ka gaarayso 18 sano. Shaqaalaha guriga daryeelka carruurta ayaa ka taxaddari doona daryeel maalmeedkaada iyo barbaarintaada. Waxaad wali sii haysan doontaa isla wakiilkaadi kaasoo kaa caawin doona arrimaha rasmiga ah ilaa aad ka gaarayso da'da 18 sano.

## GO'AAN DIIDMO AH

Laguuma oggolaanin sharciga degganaanshaha dalka, taas oo macnaheedu yahay inaadan joogi karin Finland.

Iyadoo uu la socdo go'aanka diidmada ah, ayaa Waaxda Socdaalka ee Finland waxay kuu soo saarayaan go'aan amraya inaad dalka ka baxdo.

Sidoo kale waxaa laguugu soo rogi karaa amar mamnuucaya soo gelitaanka dalka. Waxay ka dhigan tahay inaan laguu oggolayn inaad ku laabato Finland ama aagga dalalka la isku yiraahdo Schengen. Diidmadu waa mid aan muddo cayiman lahayn ama mid muddo cayiman leh.

### NIDAAMKA LA DEDEJIYEY

Haddii dalkaaga hooyo uu nabad yahay oo aad ku laaban karto, codsigaaga waxaa loo arkayaa mid aan sal lahayn. Go'aan diidmo ah ayaa si degdeg ah lagu gaari doonaa, waxaana dalka lagaaga saari doonaa si dhakhso ah, caadi ahaan 7 maalmood gudahood marka go'aanka la helo.

### DAL KA TAGISTA

Haddii arrinkaaga laga gaaray go'aan diidmo oo kama dambeys ah, waa inaad ka tagtaa Finland. Haddii aad si iskaa ah ugu noqoneysid dalkaaga hooyo, waxaad codsan kartaa caawimaadda dib u laabashada. Hadii aadan iskaa u laabanin, booliska ayaa dib kuugu celin doona dalkaaga hooyo. Kahor intaanan dib laguu celin booliiska ayaa xaqiijin doona, in adiga si ammaan leh laguugu soo dhoweeyo dalkaaga hooyo.

Haddii booliiska ay ka shakiyaan inaad isku dayi doonto inaad ka hor timaaddo dal ka saaristaada, waxaa ay kugu khasbi karaan inaad si joogto ah waqti la isla ogyahay isaga soo xaadiriso saldhigga booliska ama xerada qaxootiga.

Booliiska waxay sidoo kale go'aan ku gaari karaan in lagu geeyo xarunta haynta kummeelgaarka ah. Waaxda haynta kummeelgaarka ah waa meel xiran, oo aan laga soo bixi karin. Waa arrin naadir ah in carruurta la geeyo xarunta haynta kummeelgaarka ah. Ilmaha da'doodu ka hooseyso 15-sano ee aan waalidkood la joogin, sinnaba looma gayn karo xarunta haynta kummeelgaarka ah.

### RAFCAAN KA QAADASHADA GO'AANKA

- Waxaad xaq u leedahay inaad rafcaan ka qaadato go'aanka Waaxda Socdaalka ee Finland, oo aad u gudbiso maxkamadda maamulka. Go'aanka waxaa ku lifaaqan tilmaanbixin ama hagis ku saabsan qaabka loo samaynaayo racfaanka. Waxaa sidoo kale tilmaanbixinta laguugu sheegayaa mudada laguu cayimay ee ay waajibka kugu tahay in aad ku soo gudbiso racfaanka. Si aad racfaanka u samayso waxaad u baahan tahay qareen ama caawiye arrimaha sharciga ah, isaga ayaa samaynaaya racfaanka, iyadoo aad la wada joogtaan adiga iyo wakiilkaaga.
- Maxkamadda maamulka ayaa ansixin karta go'aanka, wax ka beddeli karta go'aanka, ama waxay ku amri kartaa Waaxda Socdaalka ee Finland, in ay markale baaraan arrinkaaga.
- Go'aanka maxkamadda maamulka kaddib, waxaad oggolaanshaha racfaanka ka codsan kartaa maxkamadda sare ee maamulka. Arrinkaan kaddib mardambe wax racfaan ah kama qaadan kartid go'aanka, waa kii kama dambaysta ahaa.
- Fadlan ogoow in Waaxda Socdaalka ee Finland aysan awoodin in ay ku siiso macluumaadka ku saabsan falanqaynta arrimahaaga. Waxaad macluumaadkaas ka heli kartaa oo keliya qareenkaaga ama caawiyahaaga arrimaha sharciga. Sidoo kale go'aanka waxaa loo diri doonaa qareenkaaga ama caawiyahaaga arrimaha sharciga.

## XUQUUQAHAADA



### Waxaad talo weydiin kartaa qareenkaaga ama caawiyahaaga arrimaha sharciga.

Waxaad xaq u leedahay inaad hesho caawimaad xaga sharciga ah, taasoo loola jeedo inaad la kulmi karto caawiye arrimaha sharciga ah inta lagu gudo jiro howsha magangelyaddoonka qaxootinnimadaada oo dhan. Haddii loo baahdo, wakiilkaaga ayaa raadinaaya caawiye arrimaha sharciga ama qareen, isaga ayaana la xiriiraaya.

Shaqada qareenka ama caawiyaha arrimaha sharciga waa, in uu talo kaa siiyo dhammaanba hawlaha socda ee la xiriira codsigaaga. Qareenku arrimaha kale kaama caawin karo.



### Turjubaan ayaa joogi doona ballamaha lala yeelan doono mas'uuliyiinta.

Turjubaanka ayaa isla goobta ballanka kuugu turjumi doona, ama khadka telefoonka ama iyadoo la adeegsanaayo xiriir maqal iyo muuqaal ah. Turjubaanada waa dhexdhexaad, waxaana saaran waajibka ah in ay xifdiyaan sirta qofka.



### Waxaad heli doontaa macluumaad ku saabsan arrimahaaga.

Waxaad xaq u leedahay inaad fiirfiiriso dokumiintiyada adiga ku khuseeya. Waxaad qoraal ahaan uga codsan kartaa Waaxda Socdaalka ee Finland, tusaale ahaan, dokumintiyada ku saabsan go'aankaaga ama wareysigaaga. Faahfaahinta ku saabsan codsigaaga laguma bixin karo taleefanka.



### Waad shaqayn kartaa, hadii aad ka wayntahay 15 sano.

Dalkan Finland carruurtu ma shaqeeyaan, keliya waxay aadaan iskuul. Waa in da'daadu ay ka weyn tahay 15 sano, haddii aad doonayso inaad shaqayso.

Waxaad bilaabi kartaa shaqada, marka ay dhowr bilood ka soo wareegto xilligii aad codsatay magangelyoddoonka qaxootinnimada. Macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan shaqo qabshada, waxaad ka heleysaa shaqaalaha xerada qaxootiga iyo bogga internetka Waaxda socdaalka ee cinwaankiisu yahay migri.fi.



### Waxaad ku noqon kartaa dalkaaga hooyo.

Waad ka noqon kartaa codsigaaga, islamarkaana dib ayaad ugu noqon kartaa dalkaaga hooyo wakhti kasta.

Waxaad codsan kartaa caawimaadda lacageed ee aad dib ugu laaban karto dalkaaga hooyo. Waxaad arrinkaan kala hadashaa sooshaladda iyo wakiilkaaga.



### Haddii aad u baahan tahay, waxaad samayn kartaa codsi cusub.

Haddii duruufahaaga si weyn isu beddeleen kadib markaad heshay go'aankaaga kama dambeysta ah, waxaad gudbin kartaa codsi magangelyo oo cusub. Ka hadal sida xaaladdaada isu beddeshay iyo sababahaaga cusub ee aad arrinkaan ku salaysay, islamarkaa aad samaynayso codsiga cusub.Haddii aadan haysanin sabab cusub oo aad ku codsato magangelyo, waxaa arrinkaaga laga gaari doonaa go'aanka ah in codsigaaga aan la baari doonin.

Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

## WAAJIBAADKAAGA

### Gacan ka gayso baaritaanka arrintaada.

Waa inaad runta u sheegtaa masuulyiinta oo aad gacan ka gaysataa baaritaanka dhammaan arrimaha la xiriira codsigaaga. Arrinkaan waxaa loola jeedaa, tusaale ahaan, inaad waraysiga ku sheegto dhammaanba sababaha aad iyaga dartood u codsanayso magangelyada. Haddii aad sheegtay macluumaad been ah, sharcigaaga degganaanshaha dib ayaa lagaaga joojin karaa.

### Waa inaad joogtaa Finland inta lagu guda jiro falanqaynta codsigaaga.

Kama bixi kartid Finland inta lagu guda jiro falanqaynta codsigaaga. Codsigaaga wuu dhacayaa, taasoo la macno ah inaan laga sii shaqeyn doonin haddii:

- aan lagula soo xiriiri karin ugu yaraan laba bilood ama
- masuuliyiintu ay ogaadaan inaad ka tagtay Finland

### Imoow ballamaha laguu qabtay.

Waa inaad timaaddaa dhammaan ballamaha laguu qabtay. Haddii aad tagi weydo wareysigaaga magangelyada sabab la aqbalii karo la'aanteed, codsigaaga waxaa go'aan laga gaari karaa iyadoon waraysi la sameynin.

Haddii aad xannuunsato, sida ugu dhakhsaha badan u wargali shaqaalaha xerada qaxootiga. Waxaad u baahan doontaa warqada dhakhtarka ee caddaynaysa imaansha la'aantaada. Markaa kaddib waxaad u gudbisaa  Waaxda Socdaalka ee Finland.

### U soo gudbi dhammaan dokumiintiyada khuseeya codsigaaga Waaxda Socdaalka ee Finland.

Haddii aad haysato baasaaboor, dokumenti aqoonsi ah ama dokumiintiyo kale oo la xiriira codsigaaga, u dhiib wakiilkaaga si uu ugu gudbiyo Waaxda Socdaalka ee Finland.

### Soo gudbi mar walba macluumaadka ugu dambeeyay ee ku saabsan halka lagaala soo xiriiri karo.

U sheeg xerada qaxootiga macluumaadkii ugu dambeeyay ee halka lagaala soo xiriiri karo. Ka jawaab telefoonka, marka shaqaalaha xerada ay ku soo wacaan. U sheeg xerada qaxootiga haddii aad beddesho telefoonkaaga iyo cinwaankaaga, ama qareenkaaga uu isbeddelo.

## ARRIMAHA KALE EE MUHIIMKA AH



### Raadinta waalidiinta

Haddii aadan garanayn meesha ay waalidkaaga ama dadkii kaa masuulka ahaa joogaan, ama aadan awoodin inaad la xiriirto, Waaxda Socdaalka ayaa isku dayi doonta inay ogaato halka ay joogaan ee ay kala xiriiri karto. U sheeg wakiilkaaga haddii, sababo jira awgood, aadan rabin in waalidkaa ama masuulkaaga lala xiriiro. Ururka Laanqayrta Cas ayaa sidoo kale kaa caawin kara inaad raadiso waaliddiintaada ama dadkii kaa masuulka ahaa. Wixii macluumaad dheeraad ah ah weydii wakiilkaaga.



### Baaritaanka da'da

Waa muhiim in masuuliyiinta ay ogaadaan da'daada saxda ah. Waxaa dhici karta in aadan haysan baasaaboor ama aqoonsi rasmi ah oo kale oo da'daada laga hubin karo. Xaaladdaas oo kale da'da waxaa inta badan loo caddeeya si dhab ah, tusaale ahaan waxaa la sameeyaa baaritaanka da'da.

Baaritaanka da'da waxaa la sameeyaa oo keliya haddii ay Waaxda Socdaalka u aragto in arrinkaas uu lagammamaarmaan yahay. Adiga iyo wakiilkaaga ayaa laga codsan doonaa oggolaanshaha baaritaanka. Haddii aad diiddo baaritaanka da'da sabab la aqbali karo la'aanteed, waxaa lagaa soo qaadayaa in aad tahay qof weyn oo qaangaar ah.

Baaritaanka ma qaadanaayo wakhti badan, mana ahan mid xanuun ku keenaya qofka. Inta baaristu socoto, dhakhtarka ayaa waraysi kaa qaadi doona, sidoo kale raajo ayuu ka qaadayaa ilkahaaga iyo curcurradaada.

Dad khubaro ah ayaa waxaa ay bixin doonaan warbixinno la xiriira da'daada. Haddii sida baaritaanku sheegaayo aad noqoto qof aan wali qaangaarin, wax arrimahaaga iskabeddelayaa ma jiraan. Haddii baritaanka lagu ogaado inaad jirto da' ka duwan middii aad sheegatay, adiga iyo wakiilkaaga waxaad heleysaan fursad aad arrinkaas fikraddiina kaga dhiiban kartaan. Haddii arrinkaan kaddib laguu aqoonsado in aad tahay qof qaangaar ah, wixii intaa ka dambeeya waxaa adiga laguula dhaqmayaa sidii qof weyn oo magangelyoddoon qaxooti ah oo kale. Waxaadna u guuraysaa xerada qaxootiga ee dadka waawayn. Sidoo kale shaqdii wakiilkaaga waa ay dhammaanaysaa.




**DAAWO MUUQAALLADA KU JIRA BOGGA YOUTUBE-KA EE WAAXDA SOCDAALKA EE FINLAND EE KU SAABSAN CODSIGA MAGANGELYADA**

- Codsashada magangelyada ee dalkaan Finland
- Sababo noocee ah ayaa lagu bixin karaa sharciga degganaanshaha?
- Yaa sameeya hawlaha kala duwan ee mid walba oo kamid ah codsiga magangelyoddoonka qaxootinnimada?
- Caawinta arrimaha sharciga ee nidaamka magangelyada
- Wareysiga magangelyada
- Sugitaanka go'aanka
- Go'aanka oggolaanshaha ah
- Go'aanka diidmada ah

migri.fi/videot-turvapaikanhakijoille

Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

TURVAPAIKKA-, MAAHANMUUTTO- JA KOTOUTTAMISRAHASTO
Euroopan unionin tuella

**MACLUUMAADKA XIRIIRKA**


**Waaxda Socdaalka ee Finland**
cinwaanka boostada: PO Box 10,
FI-00086 Maahanmuuttovirasto
taleefoon: +358 295 419 600
email: migri@migri.fi
migri.fi

**Non-Discrimination Ombudsman**
cinwaanka boostada: PO Box 24,
FI-00023 Government
telephone: +358 295 666 817
email: yvv@oikeus.fi
www.syrjinta.fi

**Xafiiska kuugu dhow ee hay'ada Qaramada Midoobay ugu xilsaaran arrimaha qaxootiga UNHCR**
cinwaan: Wenner-Gren Center,
Sveavägen 166,
11346 Stockholm, Sweden
telephone: +46 10 10 12 800
email: swest@unhcr.org
www.unhcr.org


migri.fi